



## Somalisk

### Adeegso internetka

[www.ug.dk](http://www.ug.dk)


Bog ka warrama shaqada, waxbarashada iyo  
latalinta

[www.su.dk](http://www.su.dk)


Warar khuseeya kaalmada dhaqaale ee la siiyo  
ardayda dhallinyaraada ah ee wax barasho wada

### Xarunta latalinta waxbarashada dhallinyarada ee aaggaaga:

(cinwaanka, tilifoonka, e-mailka, xilliyada shaqada iyo bogga  
internetka)



Xarunta waxaad ka helaysaa [www.ug.dk](http://www.ug.dk)



**Waxbarashadu**  
waa furaha mustaqbalka

Latalinta waxbarashada dhallinyaraada  
(ungdommens uddannelsesvejledning)

# Maxaad loo qaataa waxbarasho?

## Mudane/marwo waalid

Ka dib dugsiga hoose/dhexe, ilmahaagu waa inuu doortaa waxbarasho. Doorasho si wayn u saamaysa mustaqbalkiisa. Waxbarashadu waa jidka shaqo fiican iyo mushahar sare.

Waa muhiim, inaad si firfircoон u gacan- qabato ilmahaaga. Talooyinkaagu waxay ku caawin karaan, inuu go'aan sax ah qaato.

Waxbarashooyin badan oo la kala doorto ayaa jira, way adag tahay in giddigood la wada koobo. Waase muhiim in fursadaha kala duwan la ogaado. Wuxaan war iyo caawimo rasmi ah, labadaba ka heli kartaa lataliyaha waxbarashada dhallinyarada (UU-vejleder).

Isku day inaad isha mariso buugga yar ee "Dhallinyarada soo socota – warbixin ku saabsan waxbarashada." Ama gal bogga [www.ug.dk](http://www.ug.dk), halkasoo Aad ka akhriyi karto warar khuseeya waxbarashada iyo fursadaha shaqada.

Adiga iyo ilmahaagu ku soo dhawaada xarunta waxbarashada dhallinyada ee aaggaaga, oo ballanso kulan Aad la yeelato lataliyaha.

Mahadsanidin

Lataliyaha waxbarashada dhallinyarada ee aagaaga.

## Maxaad samayn kartaa?

- Akhri wararka khuseeya shaqooyinka iyo waxbarashooyinka kala geddisan
- Kala hadal ilmahaaga shaqada iyo waxbarashada
- Taageer ilmahaagu si uu u doorto una wado waxbarashada
- Ka qaybgal wada hadallada iyo kulamada lagu la talinayo.
- La hadal macallinka fasalka iyo lataliyaha waxbarashada dhallinyarada ee ilmahaaga
- Guriga uga dhig bar deggan iyo meel uu casharrada ku raacdo, kuna taageer ka qaybgalka caawimada casharada.

## Halkaad caawimo ka heli kartaa?

- Macallimiinta dugsiga
- Lataliyaha waxbarashada dhallinyarada ee dugsiga
- Xarunta waxbarashada dhallinyarada ee agtaada. Gadaal ka eeg cinwaankeeda.



## Waa maxay micnaha...?

- **UU** - (Ungdommens Uddannelses-vejledning), latalinta waxbarashada dhallinyarada.
- **UU-center** - Karunta waxbarashada dhallinyarada ee aagga Aad deggan tahay, xilkeedu waa latalinta dhallinyarada.
- **UU-vejleder** - qof dhallinyarada iyo waalidka kala taliya waxbarashada iyo shaqada
- **Uddannelsesbog** - qoraal faahfaahiya sida ardaygu u hawlgalo / ardayaddu u hawlgasho iyo siday ugu niyadsan yihiin dugsiga
- **Uddannelsesplan** - qoraal faahfaahiya doorashada ardayga ee waxbarashada iyo wuxuu ku talajiro inuu sameeyo mustaqbalka.